

Taageerada waalidka waxay bixisaa talobixin bilaa kharash ah iyo hagida loogu talagalay adigaaga ah waalid ama qaraabo kale oo dhow u ah ilmo ama dhalaan 0-18 år.

Way yaryihiin waxyaabo ka muhiimsan xiriirka lala leeyahay caruurteena oo in la tilmaamo caruur waxay ahaan kartaa wax fiican, laakiin xitaa hawl adiga oo dhib leh. Waalid ahaan aad ayaad adigu u tahay muhiim, laakiin mararka qaarkood waxaa adkaan karta in loo adkaysto in la ahaado waalidka la rabo in la ahaado. Tani waa wax dhamaan qoysaska caruurta leh ay wakhti la kulmaan.

Waxaa jiri kara qaylo iyo is-qab-qabsi xaaladaha maalinlaha taas oo xiriiryadan geliya imtixaan. Ilmahaagu laga yaabee in aanu seexan karin ama aanu ku qanacsanayn iskoolka ama dugsiga xanaanada. Ama waxaad u baahantahay inaad hesho caawimaad si aad u xoojiso ilmahaaga. Markaas ayaa qofku u baahan karaa taageero dhanka waalidnimada si loo helo isbadal loogu talagalay wanaaga ilmaha.

Kuwa aanu anagu nahay

Taageerada doorasho talobixin bilaa kharash ah. Halkan waxaa ka shaqeeya laba ah dadka ku takhasusay cilmiga bulshada. Waxaa waajib nagu ah xoq qarinta sharqada oo ma samayno wax ah qoraalo ah. Haddii aad u baahantahay turjubaan markaas anaga ayaa diyaarinayna.

Dhankayaga Taageerada Waalidka waxaad ka helaysaa talobixin iyo hagid dhinaca hawlaha maalinlaha iyo farsamo aad kula dhaqanto ilmahaaga dhinaca xaaladaha kala duwan. Waxaanu la kulanaa waalid ama qaraabo kale oo u dhow ilmaha iyo dhalaanka ah da'yar 0 - 18 sanno oo ku casuunaa taageero waalid oo gaar ah iyo mid koox ahaan ah.

Hadefkayagu waa in adigaaga waalidka ah aad sida ugu dhakhso badan u heshid talobixin iyo taageero markaad dareemayso inaad u baahantahay taas. Taageeradan waa mid shakhsiyad ku haboon oo ku dhisan baahida iyo rabitaanka aad adiga iyo qoyskaagu leedihiin. Waxaanu si wadajir ah uga shaqaynaa si loo helo xalyo wadajir ah kuwaas oo xoojin kara xiriiryada oo faa'iido u ah horumarka ilmaha.

Waxaanu wada shaqayn haddii loo baahdo la yeelanaa hawlaha kale tusaale dugsiga xanaanada, iskoolka, xarumaha qoyska iyo maamulka gobolka Västerbotten.

Haddii aad dareemayso in aanad hubin qofka aad la xiriirayso ama aad isweydiineyso wixi ku saabsan in la ahaado waalid, ha ka walaacin inaad la soo xiriirto anagayaga joogna Taageerada Waalidka. Adigu ma tihid keligaa!

Nala soo xiriir

Waxaad naga helaysaa telafoonka 0910 – 71 20 50, laakiin waa caadi in xitaa iimayl loo soo diro foraldrasupporten@skelleftea.se

Waxaanu ku naalaa dhismahayaga ku yaala Kanalgatan 77 ee bartamaha Skellefteå

Nagala soco Instagram (foraldrasupporten_skelleftea) iyo Facebook (Föräldrasupporten Skellefteå kommun)